

# Deeqda Dib usoo Celinta Shirkadaha Yaryar iyo Dhaxdhaxaadka ah

## Dulmar

Deeqda Dib usoo Celinta Shirkadaha Yaryar iyo Kuwa Dhaxdhaxaadka ah (The Small and Medium Enterprise Relaunch Grant) waxay kaalmo lacageed siineysaa ganacsiyada Alberta, iskaashatooyinka, iyo ururada aan macaash doonka ahayn ee lagu amray inay xiraan ama yareeyaan hawlgalada oo ay la kulmeen hoos u dhac dakhli oo ugu yaraan 30% ka dhashay faafida KOOFIID-19.

Ganacsiyada Alberta, iskaashatooyinka iyo ururada aan macaash doonka ahayn oo u shaqeeya in kayar 500 shaqaale ah oo lagu amray inay xiraan ama yareeyaan hawlgalada ee ahaa amarada caafimaadka bulshada awgood ee ay soo saareen Saraakiisha Caafimaadka ee Alberta ayaa laga yaabaa inay xaq u yeeshaan

Waxay hay'adaha lacagtaan u isticmaali karaan sidey u arkaan inay ku habboon tahay oo ay ku jiraan bixinta kirada, mushaharka shaqaalaha, ama kharashaadka fulinta tallaabooyin cusub si loo yareeyo gudbinta halista KOOFIID-19.

## Maalgelinta

Ururada u qalma waxay dalban karaan 15% dakhligooda inta lagu jiray KOOFIID-19, illaa ugu badnaan kana bilaabaneyso \$ 5,000 maalgelin ah. Codsadeyaasha uqalma ee gobolada ay saameeyeen amarrada cusub ee caafimaadka) ee looga baahnaa in lagu yareeyo shaqadooda ayaa sidoo kale dalban kara lacag bixin labaad oo gaareysa \$ 15,000 (Nofeember 2020 iyo wixii ka dambeeya. Deeqdan ayaa ha mid la canshuurayo laguna caddeeyaa canshuur celinta sanadlaha ah.

Ganacsiyada cusub oo u qalma oo bilaabay howlahooda intii u dhaxeysay Maarso 1, 2020 iyo Oktoobar 31, 2020, waxay dalban karaan deeq lacageed oo gaareysa \$15,000. Qadarka la siiyo ururada u qalma waa 3 jeer ah 15% dakhliga soo gala ururka bishii. Tusaalooyinka ku saabsan sida lacagta loo xisaabiyo, fadlan tixraac tilmaamaha barnaamijka ([program guidelines](#)).

## Uqalmitaanka

Shuruudaha uqalmitaanka buuxa waxaa laga heli karaa tilmaamaha barnaamijka. ([program guidelines](#)).

Si aad xaq ugu yeelatid barnaamijka, ururadu waa inay:

1. Noqo mid ka mid ah hay'adaha sharciyeysan ee soo socda laga bilaabo Febraayo 29, 2020 ama Oktoobar 31, 2020 (ganacsiyada cusub oo keliya):
  - Shirkad ka diiwaan gashan Sharciga Shirkadaha Ganacsiga (Alberta)
  - Shuraako ku diiwaan gashan Xeerka Iskaashiga (Alberta)
  - Milkiile kaligiis ah oo leh magac ganacsi oo ka diiwaan gashan Sharciga Iskaashiga (Alberta)
  - Shirkad sida gaarka ah loo diiwaan galiyey ama loo tixgaliyey oo sharci dejinta Alberta ah
  - Aan macaash doon ahayn oo ka diiwaan gashan sida gaarka ah ama fal gaar ah oo sharci dejinta Alberta ah
  - Aan macaash doon ahayn oo ka diiwaan gashan qaybta 9 ee Sharciga Shirkadaha (Alberta)
  - Bulshada ka diiwaangashan Sharciga Bulshada (Alberta) ama Xeerka Bulshooyinka Beeraha (Alberta)
  - Iskaashato ka diiwaan gashan Xeerka Iskaashatooyinka (Alberta)

[www.alberta.ca/sme-relaunch-grant.aspx](http://www.alberta.ca/sme-relaunch-grant.aspx)

2. Joogtee xarun rasmi ah oo ku taala Alberta oo lagu aasaaso (oo si wanaagsan u taagan) iyada oo shuruudaha looga baahan yahay ee ficillada/sharciga ku habboon;
3. Inaad fuliso ganacsi/hawlgallo ama aad xaq u leedahay inaad ka sii wadato hawlo ganacsi/ganacsi gudaha Alberta ee Febraayo 29, 2020, ama Oktoobar 31, 2020 (ganacsiyada cusub oo keliya);
4. Aad haysato in kayar 500 oo shaqaale ah (waqti buuxa + waqti dhiman + qandaraas ah);
5. Faahfaahin kara sida iyo goorta hawlgalada si ku meel gaar ah loo xiray ama loo yareeyey ayadoo la raacayo amarka caafimaadka dadweynaha ee KOOFID-19;
6. Aad la kulantay hoos u dhac ku yimid dakhliga ugu yaraan 30% bishii Abriil ama Maayo 2020 marka la barbardhigo Abriil 2019, Maayo 2019, ama Febraayo 2020 taasoo ka dhalatay amarrada KOOFID-19 ee caafimaadka dadweynaha.
  - Ganacsiyada cusubi waa inay muujiyaan hoos u dhaca ku yimid dakhliga ugu yaraan 30% Nofeembar ama Deseembar. 2020 marka la barbardhigo bil kasta inta u dhexeysa Maarso iyo Oktoobar 2020 ka dhalatay KOOFID-19 ee amarada caafimaadka dadweynaha.
7. Ay furanyihiin ama qorsheynayaan inay dib ufuraan maadaama amarada caafimaadka bulshada laga qaaday iyadoo loo marayo dib u bilaabida wejiga Alberta;
8. Ma helin wax lacag bixin ah, deeqo ah ama qaddar ah oo laga helo ilaha dawladda dhexe ama gobolka ama caymiska si loogu beddelo ama loo magdhabo khasaarihii dakhliga ee aan ahayn ilaha ku qoran tilmaamaha barnaamijka. Fadlan eeg tilmaamaha barnaamijka ([program guidelines](#)) wixii macluumaad dheeraad ah.

Ururada leh xarumo badan joogto ah oo ku yaal Alberta arkay hoos u dhaca dakhli ayaa xaq u leh inay codsadaan maalgelin ee xarun kasta. Tan waxaa ka mid ah dhacdooyinka ay hay'adda ku leedahay wax ka badan hal goob/cutub/ laan taasoo la kulantay hoos u dhac dakhli oo ugu yaraan 30% sababo la xiriira amarrada caafimaadka dadweynaha ee KOOFID-19.

Fadlan soo gudbi codsiyo gooni ah goob /laan kasta, oo calaamadee sanduuqa ku habboon ee arji codsi ah.

## Sida loo codsado

Dhammaan codsiyada waa in lagu soo gudbiyaa barta internetka ee arjiga, oo laga helo barnaamijka bogga. Ganacsiyada u qalma, iskaashatooyinka iyo kuwa aan macaash doonka ahayn ee ka socda dhammaan deegaan kasta kamid ah gobolka ayaa codsan kara wakhti kasta illaa inta qaadashada arjiga ee barnaamijka ([program webpage](#)) la xirayo.

Qaadashada arjiga wuxuu furnaan doonaa illaa 31ka Maarso 2021, haddii kale si kale loola socodsiiyo mooyee.

Barnaamijka wuxuu ujeedkiisu yahay inuu ka baaraandego codsiyada isla markaana soo saaro lacag bixinno 10 maalmood oo shaqo gudahood ah ka dib soo gudbinta. Codsiyada leh macluumaad aan dhammeystirnayn ama qaldan, ama codsiyada u baahan dib u eegista gacanta, waxay la kulmi doonaan dib u dhac ku yimaada howsha.

### Ma u baahan tahay inaadogaato wax badan?

Dhammaan faahfaahinta barnaamijka, oo ay ku jiraan shuruudaha uqalmitaanka iyo sida loo codsado booqo:

[www.alberta.ca/sme-relaunch-grant.aspx](http://www.alberta.ca/sme-relaunch-grant.aspx)